

Maarso 11, 2020

Bulshada Qaaliga ah Dugsiyada Dadweynaha ee Boston:

Dugsiyada Dadweynaha ee Boston (BPS), oo ay weheliyaan magaalada iyo madaxda caafimaadka, waxay sii wadayaan inay si dhaw ula socdaan dhibaataada caafimaad ee soo kordhaysa ee la xidhiidha hergebka-dabeyska. Macluumaadka soo socdaa waa macluumaadka ugu fiican iyo talooyinka aan hayno ilaa maanta. Iyada oo hergebka-dabeyska sii faafayo, tiro yar oo iskuulo iyo jaamacado ah oo ku baahsan dalka oo dhan, oo ay ku jiraan Massachusetts, ayaa xirnaa maalin ama wax ka badan. Si la fahmi karo, qoysasku waxay bilaabeen inay isweydiyaan haddii Dugsiyada Dadweynaha ee Boston ay xirayaan qaar ama dhammaan dugsiyadeena goor dhow.

Iyadoo ku saleysan macluumaadka aan maanta hayno, khabiiri caafimaad, oo ay ku jiraan Xarumaha Xakamaynta Cudurrada (CDC), Guddiga Caafimaadka Dadweynaha Boston (BPHC), iyo Waaxda Caafimaadka Dadweynaha Massachusetts (MDPH) maku talinin xiritaanka dugsiyada waqtigan Boston. Dhakhaatiirta iyo madaxda caafimaadka dadweynaha waxay inta badan yaqaanaan sida looga ilaaliyo dadweynaha waxyaabaha walaacyada la xiriira ee caafimaadka waxaanan sii wadi doonaa ku tiirsanaanta talobixintooda iyo hogaamintoodaba. Si aad u hesho macluumaadka ugu horeeya iyo talaabooyinka ka hortagga ee sida caafimaadka loo qabo, booqo bphc.org ama bostonpublicschools.org/coronavirus.


Waan fahameeynaa in waalidiinta qaar ay dooran karaan, taxadar aad u badan, si ay ubadkooda ugu hayaan guriga inkasta oo ay soo jeediyeen khubarada caafimaadka bulshada. Haddii waalidiintu go'aansadaan in aysan u dirin carruurtooda dugsiya, maqnaanshuhu waa inuu la socdo warqad waalid / mas'uul ama imaylka dugsiya. Maqnaanshahaas marmarsiinyo ayuu yeelan karaa.

BPS waxay kaloo qaadaysaa talaabooyin dheeri ah si ay u hubiso nadaafada dhismayaashayada iyo basaskeena. Dugsiyadeena waxaa ku socda nadaafad dheeri ah, taxaddar dheeraad ah ayaa loo hayaa diyaarinta cuntada heerka sare ah, iyo koox u heellan oo dadka waaweyn ah ayaa diiradda saaraya ilaalinta nabadgelyada carruurta. Waxaan sidoo kale ka codsaday maamulayaasha dugsiya inay shaqsi ahaan la socdaan musqulaha ugu yaraan seddex jeer maalintii si loo hubiyo inuu jiro saabuun ku filan. Haddii saabuun bixintu ay hooseeyso ama jaban yihiin, macallimiinta, shaqaalaha dugsiya iyo ardayda waa inay la socodsiiyaan mas'uul ama xubin ka tirsan shaqaalaha dugsiya.

Waxaan sii wadaynaa wada shaqeynta aan la leennahay magaalada iyo madaxda caafimaadka si aan ugu sameyno waxa ugu wanaagsan ardayda iyo qoysaska waxaanan sii wadi doonaa inaan idin la socodsiianno markii macluumaadka uu noqdo mid diyaar ah.

Kuma xoog saari karno in ku filan: **Muhiimadeena koowaad ee BPS waa caafimaadka iyo jiritaanka ardaydeena iyo qoysaska.** Tani waxay noqon doontaa diiradeena koowaad anagoo sii wadeeyno kormeerka xaaladda si u dhow khuburadeena caafimaadka bulshada waxaanna go'aamineynaa habka ugu wax ku oolka ah ee wax looga qaban karo walaaca caafimaadka bulshada ee socda.

Si daacad ah,



Dr. Brenda Cassellius
Kormeeraha guud

Boston Public Schools
Dr. Brenda Cassellius, Superintendent

Boston School Committee
Michael Loconto, Chair

City of Boston
Martin J. Walsh, Mayor

